

Badqabka Cuntada Dabka Kadib

SHAQADA IYO GURMADKA

Talaabooyinka la qaadaayo

1. Jooji shaqada isla markaba haddii khatar wayn ama halis caafimaad ay jirto ama badqabka cuntada aan la xaqiijin karin.
2. U sheeg maamulka sharciyaynta haddii loo baahdo. Dab aan lasoo sheegi karin waxaa kamid ah dab yar oo la damiyayoon sumaynayn cuntada.
3. Kala shaqee maamulka sharciyaynta si loo go'aansho cuntada aad haysanayso iy midda aad iska tuurayso.
4. Nadiifi oo goobta mari daawada jeermis dilista.
5. Haddii ay muhiim tahay, qaado ogolaanshaha maamulka sharciyaynta kahor intaadan ganacsiga dib u furin.

Khataraha badqabka cuntada

Dabka ayaa waxyeelayn kara qasacyada, taasoo keenaysa in suntu gaarto.

Qiiqa, holaca, kiimikada dab daminta iyo biyaha la cadaadiyay ayaa geli kara baakadaha kana dusi kara daboollada qasacyada.

Aaga khatarta ee heerkulka

Cabirka heerkulka ee bakteeriyada cudurka keenta si ugu fiican ugu dhalato ee xakamaynta heerkulka badqabka cuntada (TCS) ayaa loogu yeeraa aaga khatarta ee heerkulka.

- Aaga khatarta ayaa u dhexeeya 41°F iyo 135°F.

- Cuntada kulul kulayl ha ahaato midda qaboowna qaboow ha ahaato. Mar kasta isticmaal aalada heerkulka cabirta si aad u hubiso heerkulka gudaha ee cuntada TCS.

Waxa aad iska tuurayso

- Cuntada bilaa daboolka ah ama cuntada la gashay baakada neefsan karta sida alwaaxa, duubka caaga ah, bacda, xaashida, iyo qasacyada leh daboollada ama meesha kore ee laga furo. Haddii aad iibiso khamri, la xariir [Kormeeraha Sharci Fulinta Khamriga iyo Khamaarka \(Alcohol and Gambling Enforcement Inspector\)](#) ee degmadaada.
- Cuntada ku jirta talaagadaha iyo baraf dhaliyaasha. Cuntadaan way sumoobi kartaa maadaanma aynan albaabada qalabku aysan si sajal ah u xirnayn.
- Barafka ku jira furarka ama baraf sameeyaasha.
- Dhammaan cuntada TCS ee ku jirtay heerka heerkulka khatarta ah wax ka badan afar saac. Cuntooyinka TCS qaarkood waa hilibka xoolaha, digaaga, cuntada badda, caanaha iyo ukunta.
- Agabka halka mar la adeegsado (maacuunta, saxuunta caaga ah, koobabka, iwm.).
- Qasacyada duusmay ama daxasha yeeshay.
- Dhammaan cuntada iyo maadooyinka u muuqda kuwo sumoobay ama waxyeelo gaartay.

Markaad shaki qabto, iska tuur.

Nadiifinta iyo jeermis dilida

Kadib dabka, nadiifi dhammaan meelaha aan cuntadu taaban ee qalabka.

Si adag u dhaq, u biyo raaci oo jeermis dile u mari meelaha cuntada taabato ee qalabka kahor intaadan dib u furin. Raac talaabooyinka:

1. **Ku dhaq** biyo kulul, oo saabuun leh. Dhaqistu waxay meesha ka saaraysaa sunta ka hartay dabka.
2. **Ku biyo raaci** biyo nadiif ah. Biyo raacinta ayaa meesha ka saarta saabuunta una diyaarisa dusha meesha jeermis dilid.
3. **Ku nadiifi** kiimikooyin iyo biyo kulul.
 - Kiimikooyinka: mar kasta raac tilmaamaha cabirka. Adeegso xooga loo baahan yahay ee dareeraha jeermis dilaha iyo waqtiga la rabo inuu meesha marsanaado.
 - Biyo kulul: weelasha gacanta lagu dhaqo, ku rid qalabka biyo heerkulkoodu yahay 171°F ama ka badan ugu yaraan 30 sikin. Weel dhaqaalka farsamo, shuruudaha heerkulka iyo cadaadiska biyaha ayaa kaladuwan ayagoo ku xiran nooca mashiinka.

Qalabka sida baraf sameeyaasha, qalabka qaybiya cabitaanka iyo sharoobada iyo qalabka biyaha shuba ayaa lahaan kara shuruudaha nadiifinta oo gaar ah. Raac tilmaamaha shirkada alaabta samaysay.



Dhaq Biyo raaci Jeermis-dil

Macluumaadka

[Alcohol and Gambling Enforcement Inspector](https://dps.mn.gov/divisions/age/alcohol/Pages/inspectors.aspx)
(<https://dps.mn.gov/divisions/age/alcohol/Pages/inspectors.aspx>)

Hennepin County Environmental Health

479 Prairie Center Drive Eden Prairie, MN 55344

612-543-5200 | www.hennepin.us/envhealth

Food safety after fire_Somali_HC_6-25

Content courtesy of the [Minnesota Department of Health](https://www.health.state.mn.us/)

